

## OFFICIAL

Dadka degan  
25 King Street  
PRAHRAN

Mudanaha/Marwada guriga degan

Waxaan qoraalkan kuugu soo dirayaa inaan kula wadaago xog muhiim ah oo ku saabsan dhismaha aad degan tahay ee 25 King Street, Prahran.

Sanadkii 2023, Dawlada Victoria waxay ku dhawaaqday in dib loo dayactirayo 44 dhismayaal oo ah sarihii dhaadheera ee guryaha dowlada ee duqoobay si dadka hada degan sarahaas iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba loo siiyo guryo ka wanaagsan, ka amni fiican isla markaasna ka raaxo badan kuwii hore.

Dhismaha aad degan tahay ee 25 King Street wuxuu qayb ka yahay marxalada xigta ee dib u dhiska. Tani waxay ka dhigan tahay in dadka degan dhismaha aad degan tahay aan ka caawin doono sidii ay ugu guuri lahaayeen guryo cusub oo ku habboon baahidooda.

Waxaan haysanaa wakhti badan oo aan ku wada qorshayn karno guuritaankaaga. Laga bilaabo bisha Juun, shaqaalaha adiga kaa caawinaya howlaha dib-u-dejinta ayaa bilaabi doona inay kaala hadlaan sidii aad ugu guuri lahayd guri cusub. **Inta u dhaxaysa bisha Luulyo 2026 iyo bisha Febraayo 2028**, si dhow ayaan kuula shaqayn doonaa si aanu kuugu helno guri daboolaya baahiyahaaga.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka ag dhawaato goobta aad hada degan tahay, waxaad eegi kartaa guryaha cusub ee laga dhisayo Simmons Street, South Yarra. Guryahaan waxay diyaar noqon doonaan dabayaaqada sanadkan iyadoona kiradaada ay sii ahaan doonto inta ay hada tahay.

Waxay lahaan doonaan waardiyeaal/amni ka wanaagsan kii hore, qalab cusub oo ah qalabka guryaha la geliyo oo ka fiican kii hore, musqulo si sahlan loo geli karo, qaboojiye iyo kuleyliye, iyo sidoo kale balakoono iyo qolal kuu gooni ah oo dharka lagu dhaqdo.

Qaar ka mid ah dadka deegaanka ayaa laga yaabaa inay rabaan inay sahamiyaan guryaha kale ee la heli karo ee ka ag dhow qoyska, asxaabta ama adeegyada muhiimka ah. Waxaa jira

*Aragtida farshaxamiistaha ee guryaha cusub ee South Yarra*



guryo dowlad oo ku kala yaal Melbourne iyo Victoria oo dhan oo laga yaabo inay ku habboon yihiin baahiyahaaga.

## **Waxa xiga ee dhici doona**

Uma baahnid inaad adigu hadda wax samayso. Bisha Febraayo, waxaan kuu soo diri doonaa su'aalo kooban. Intaysan howlaha raritaanka si rasmi ah u bilaabmin bisha Luulyo, waxaan jeclaan lahayn inaan fahanno waxa adiga muhiimada kuu leh iyo macluumaadka iyo taageerada aad rabto. Waxaan rabnaa inaan xilli hore kula sii tashano, si aan u fahanno noocyada guryaha iyo isku xirka adeegyada caafimaadka iyo bulshada ee aad u baahan tahay, iyo haddii ay dadka deegaanka qaarkood jeclaan lahaayeen inay isla guuraan deriskooda si loo wada dejiyo meel isku dhow.

## **Waxyaabo fiican oo loo baahan yahay in la xasuusnaado**

### **Xuquuqda aad leedahay iyo kiradaada inta ay ahaaneyso waxba iskama badalayaan.**

Guriga cusub ee aad degi doonto weli waxaad ku lahaan doontaa dhammaan xuquuqdii iyo xaqdhowrkii aad ku lahayd kii hore oo kale sida uu qabo Sharciga Kiraystayaasha Guryaha Kiraysta (Residential Tenancies Act). Kiradaada waxaa loo qiyaasi doonaa sida loo qiyaasay tan guriga aad hada degan tahay, iyadoona la qirayo in sidoo kale laga yaabo inaad xaq u leedahay Kaalmada Kirada Dawlada Dhexe (Commonwealth Rent Assistance).

**Taageerada shakhsi ahaaneed.** Waxaad heli doontaa shaqaale adiga kuu heelan oo kaa cawin doona howlaha dib-u-dejinta si ay kuu hagaan inta ay socdaan howlaha dib-u-dejinta. Waad noo sheegi kartaa haddii aad rabto in qof ka tirsan qoyskaaga, saaxiib ama lataliye ay kugu wehlinayaan kulannada aad nala yeelanayso. Waxaan kuu diyaarin karnaa turjubaan haddii loo baahdo.

**Caawinta lagaa caawinayo guuritaanka.** Waxaanu kuu diyaarin doonaa dad alaabta kuu rara, waxaan kuusoo xiri doonaa waxyaabaha aad u baahan tahay in lagu soo xiro sida telefoonka, interneedka iyo in waraaqaha boostada laguugu soo dirayo aan kuusoo wareejino sidoo kalena aan bixino dhammaan kharashka ku baxaya guuritaanka intii macquul ah.

## **Kaalay oo nala hadal**

Isbuucan iyo bilaha soo socda, waxaan booqan doonaa qolka bulshadaada si aan uga jawaabno wixii suaal ah ee aad qabto. La soco ogeysiisyada lagu soo dhejin doono qolka bulshada si aad u ogaato wixii ku saabsan maalmaha iyo xilliyada. Shaah iyo kafee ayaa la diyaarin doonaa.

Haddii aadan imaan karin, saas ay tahay weli waad nala soo xiriiri kartaa:

- booqo [homes.vic.gov.au](https://www.homes.vic.gov.au)
- ka wac khadkeena taageerada heeganka ah 1800 716 866
- la hadal xafiiska guryaha ee deegaankaaga.

Mahadsanid

**Simon Newport**

Madaxa Fulinta

ee Homes Victoria

28/01/2026

search **homes victoria**



[homes.vic.gov.au](https://www.homes.vic.gov.au)

